



Guddiga PPS wuxuu ku kordhiyaa qandaraaska Guerrero ilaa 2022

Guddiga Dugsiyadda Dadweynaha ee Portland ayaa si buuxda u ansixiyay in ay kordhiyaan qandaraaska hada ee Kormeeraha Guadalupe Guerrero ilaa labo sano oo kale intii lagu jiray ku;ankoodii Talaadadii, 25-kii Juunyo. Tan iyo markii uu soo gali doono sanadka saddexaad ee qandaraaskiisa asalka ahaa, Guddiga wuxuu ballan-qaaday wadar ahaan shan sano illaa Juun 2022 iyadoo Guerrero u hayo shukaanka. Ansixinta ayaa timid ka dib markii xubnaha guddiga ay soo bandhigeen dib u eegis guud oo ku saabsan wax qabadkiisa.

"Cadad shaqo aad u yaab leh ayaa la dhammeystiray" muddadii 21 bilood ee Guerrero uu hoggaamiyay degmada, ayuu yiri Guddoomiyaha Guddiga Rita Moore. Xubnaha kale ee guddiga ayaa xusay in Guerrero u dhigay aasaas hoose oo u ogolaan doonta degmada inay si aad ah diirada u saarto horumarinta natiijooyinka ardayga sanadaha soo socda, laga bilaabo 2019-20.

"Dhammaan qeybaha ayaa la hagaajiyay si ay u helaan sanad wanaagsan," ayuu yiri Julia Brim-Edwards. Guerrero sidoo kale waxaa lagu amaanay shaqadiisa akhlaaqdiisa iyo dejinta dhaqdhaqaaq si loo qeexo aragtida degmada iyo horumarinta qorshe istaraatiijiyadeed.

Guerrero, oo mudadiisa xafiiska PPS uu bilaabmay Oktoobar 2017, wuxuu sheegay in uu rajeynayo inuu inuu waqti ku qaato dugsiyada isla markaana diiradda saaro sidii loo caawin lahaa maamulayaasha iyo barayaasha siyaabo u sahlay guusha ardayga - mida ugu muhiimsan uguna dambaysa, qiyaas ahaan bartilmaameed u ah isaga iyo degmada. Wuxuu xusay xasiloonaada kooxda hoggaamiyeyaashiisa iyo awooddooda ay u leeyihiin inay diiradda dheeri ah saarto dugsiyada iyo bulshada dugsiya.

Xubnaha Guddiga waxay xuseen guulo fara badan oo ay ka mid yihiin:

- Furitaanka laba dugsi dhexe oo cusub oo ku yaal Roseway Heights iyo Harriet Tubman.
- Ku-shaqeynta bulshada si loo sameeyo aragtida cusub ee PPS.
- Mudnaan siinta barnaamijyada tacliinta iyo taageerada habdhaqanka ardayda.
- Nadiifinta xisaabtanka maaliyadeed iyo miisaaniyad la akhrisan karo, oo hufan.
- Shaqaaleynta koox hogaamineed oo xasilloon, tayo sare leh.

"Waan ku mahdinayaa sida gudiga ugu muujiyay kalsoonida hogaamintayda," ayuu yiri Guerrero. "Koox ahaan, waxaan sameynay horumar wax ku ool ah, waxaana garowsanahay in ay jirto shaqo badan oo naga horeysa."

Waxa uu intaa raaciyay in uu "ku faraxsan yahay in uu la shaqeeyo barayaasheena heelan, shaqaalaha taageerada adag iyo hoggaamiyeyaasheena xarumaha dhexe ee ujeedadeena la wadaago ee ah in kor loo qaado natiijada ardayga ee heerarka ugu fiican ee PPS."